TIPS FOR PARENTS

Homework

Leylisyada Guriga Looga Shaqeeyo

Siyaabaha waalidiinta iyo daryeelayaasha caruurta (caregivers) ay ilmahooda u caawini karaan, si' ay guul uga keenaan iskuulka, waxaa ka mid ah ku dhiirigelinta ka shaqeynta leylisyada guriga loo soo siiyo.

Waa maxay leylisyada guriga?

Noocyada howlaha ay ardayda guriga usoo qaataan waxaa ka mid ah:

- Leylisyada ay hore uga shaqeyeen iskuulka oo dhameystirid u baahan.
- Ka shaqeynta mowduuc mashruuc cilmi-baaris (research project) ahaan loo siiyay.
- Isu diyaarin tijaabooyin (tests) ama imtixaano (exams).
- Dib-u-akhrinta xirfado ay fasalka kusoo qaateen.
- Isuku-duwidda waraaqaha iyo qaabeynta dafaas-iirta iskuulka.
- Akhrinta iyo daalacashada bogag macallinku ka cayimay bug-sheeko (novel) ama bugga-iskuulka (textbook).

Halkee iyo goorma laga shaqeeyaa leylisyada guriga leysu soo siiyo?

- Ardayda oo dhan, sideedaba, isku si' wax uma bartaan. Qaar waxey jecel yihiin iney keligood ay meel cidlo ah ku shaqeeyaan; qaar kale waxey jecel yihiin iney muusiko dhegeysanaya marka wax daalacanayaan; qaar kalena waxey jecel yihiin iney saaxiibadooda wax la bartaan. Ogow! Cid cunugaaga kaa badiyo ma jiro. Sidaas darted, gacan ku sii qaabka uu doorto iyo meesha uu doorato oo uu kaga shaqeyn karo leylisyada guriga loo soo siiyay.
- Waxaa markasta haboon in ardayga uu caateysto inuu waqti go'aan ka shaqeeyo leylisyada guriga loo soo siiyo. Joogteeynta waqtiga go'aan waxay keeneysaa howsha oo la caadeysto. Haddii kale, waxaa dhici kareysa in cunugga isku dayo inuu ka leex-leexdo ka shaqeyn leylisyadiisa, dabadeenda, waxey arrintaasi keeneysaa muran iyo iska horimaad.
- Isku day in ardayga uu fiidnimada hore ka shaqeeyo leylisyada guriga, siiba marka tamarta iyo dareenka ardayda ay sareeyaan. Kaddib sii caruurtaada waqti yar oo ay ku nastaan ka hor inteyan seexashada aadin.

Waqti intee la ek ayaa la rabaa in ardayda ka shaqeeyaan leylisyada guriga?

- Sideedaba, ma jiraan tiro "sax" oo leylis ahaan loo xaddaday. Cilmi baarista iyo macallimiintuba waxey isku raaceen in ardayda dugsiga hoose-dhexe la siiyo tiro leylisyo oon badneyn, kaddibna tiradaasi ay sii kororto marka ardaydu ay galaan dugsiga sare.
- Ardaydu xowliyo kala duwan ayey ku shaqeeyaan, sidaas awgeed, muddada ka qaadaneyso ka shaqent leylisyada waa mid markasta kala duwan.
- Waxaase markasta lagama maarmaan ah in ardaydu ay awoodi karaan inay ka shaqeeyn karaan leylisyada guriga loo soo siiyo. Islamarkaana, waa inay helaan waqti ay uga qeybgalaan howlaha kala sida, isboortiga, iskaa-wax-u-qabso, muusikada, barashada luqadaha, casharradada diinta, iyo ciyaaraha kala duwan.
- Haddii aad gucato in cunugaada lasoo siiyo leylisyo badan ama leylisyo yar, la xiriir macallinka wax u dhiga.

Sidee waalidiintu gacan uga geysan karaan leylisyada ardayda guriga loo soo siiyo?

- Si ay ardayda u iloobin waqtiga loo xaddaday sameynta leylisyada iyo marka ay leeyihiin tijaawooyinka iyo imtixaannada, ardayda waaweeen ku dhiirigeli inay ballanadaas ku qoraan xusuusqorka-iskuulka (school agenda). Sidoo kale, gacan ku sii iney kalendar weyn sameystaan oo ay ku qortaan jadwallada mashaariicda waaweyn.
- Marka laga reebo mashruucyada cilmi-baarista, leylisyada ardayda guriga loo soo siiyo waxey sideedaba u badan yihiin casharro ay ardaydu hore

people for Education
BECAUSE EDUCATION MATTERS MOST

Copies are available in several languages at *www.peopleforeducation.com.*
For more information, call 416-534-0100 or email: *info@peopleforeducation.com*
© People for Education 2009
The Ontario Trillium Foundation
La Fondation Trillium de l'Ontario
toronto community foundation

Homework

ugu soo qaateen fasalka gudihiisa. Sidaas darteed, wey ku fillan yihiin iney ka shaqeeyaan leylisyadaasi.

- Inta caruurtaada ay ku howlanyihiin ka shaqeynta leylisyadooda, waalidka waa inuu kasii shaqeystaa howlahiisa u gaarka ah sida: bixinta biilashada, waraaqo qoris, bug-akhris iwm. Arrintaasi waxey leedahay laba faa'iido: kow, waxaad caruurta u noqoneysa wheel; marka xiga howshooda ayaad kormeeraysaa. Haseyeeshee, waa inaadan marnaba caruurta u sameyn leylisyadooda, iney gargaar kaa codsadaan mooyaane.
- Caruurta yaryar wadajir wax u wada akhriya, si aad ugu meeriso, kuwa waaweynse ku dhiiri geli inay maalin kasta ay iskooda wax akhriyaan.
- Caruurtaada maalin kasta kala sheekeyso amuuraha iskuulkooda. Xataa haddii aadan waxba ka garaneyn maadooyinka ay qaataan, ama luqadda Ingriiska ama Fransiiska oo ay wax ku bartaan, maxaa yeelay waxaad u noqoneysaa dhegeyste wacan. Cilmi-baaristu waxey qireysaa in ka guul keenista waxbarashada caruurta ay sii kordheyso marka waalidiintu ay si joogto ah ula socdaan amuuraha iskuulka. kalana sheekeystaan caruurtooda.
- Xaqiiji in caruurtu ay wada heystaan dhamaan qalabka ay u baahan yihiin iney leylisyadooda kaga shaqeeyaan, sida qalmaanta, laabisyada, mastarada waraaqaha iyo qalmaanta midibbada lehba.

Maxaa lagaa rabaa inaad sameysid haddii caruurtu ay dhib kala kulmaan ka shaeynta leylisyada guriga?

- Ku dhiirageli caruurtaada iney macallinkooda la hadlaan siiba marka ay caawinaad u baahan yihiin. U sheeg in aanu ceyb aheyn in macallinka gargaar la weydiisto marka ay garan waayaan qeyb ka mid ah casharka.
- Haddii cunugaada garan waayo leyliska lasoo siiyay, weydii waxa macallinka u sheegay marka uu casharka sharaxay. Arrintaasi waxey cunugaada dib u xusuusineysaa habka ma'alada looga shaqeeyay iyo sida xalka loo gaaray.
- Haddi cunugaada ay ku cuslaato, ka niyad jabo ama uu ka xanaago ka shaqeynta leyliska, u sheeg inuu ka hakado howsha, uuna cabaar kadib bilaabo.
- Haddii cunugga inta karaan kiisa ah ka shaqeeyo leyliska, haseyeeshee ay ku adkaato dhameystirkeeda, waxaa haboon inuu howsha uu dib iskuulka u geeyo iyadoon dhameystirneyn. Waxaase waalidka laga rabaa inuu raacyo qoraal cudurdaar, ood ku qorto isla warqadda leyliska ama xusuusqorka ardayda ood ugu sheegeysid macallinka sababta uu ardaga u dhameystiri waayay howshiisa. Qoraalkaasi wuxuu macallinka u qirayaa mushkilada ardayga la kulmay, wuxuu kaloo ka marag furauyaa in waalidku uu dabasocdo waxbarashada cunugiisa.
- Haddii cunugaada uu si joogto ah dhibaato ugala kulmo ka shaqeynta leylisyada lasoo siiyo, ballan la dhigo macallinkiisa si aad uga arrinsataan mushkiladaasi.

Habka kale oo ardayga looga gaargaari karo leylisyada lasoo siiyo.

- Ka baadigoob iskuulada, maktabadaha iyo ururrada bulshada, adeegyada kala duwan oo ay bixiyaan oo lagu kobciyo aqoonta ardayda. Dugsiyada iyo maktabadaha qaarkood waxey qabaan ururro aqoon-kororsi ah (homework clubs) oo gelinka dambe ah oo ardayda lagu gargaaro.
- Waxaa kaloo ardayga uu caawinaad ka heli karaa isla saaxiibadiisa iyo walaalahiisa ka da'da weyn.
- Dugsiyada sare waxey qabaan arday maadooyinkaas horey usoo qaatay oo ardayda kale ka gargaara xagga xisaabta iyo saaniska.
- Waxaa kaloo jira Bog Internet, *www.ilc.org.* oo ardayda dugsiyada sare laga gargaaro iyadoo kharash la'aan ah. Waxaa halkaas maalmaha Axadda illaa Khamiista diyaar ugu ah maclimiin takhasus gaar u leh oo talo iyo jawaab-celinba (feedback) siinayaan.
- Guddonka Waxbarashada ee Dugsiyo qaarkood waxey Internetka ka bixiyaan casharro iyo leylisyo ee fasalo kala duwan leh. Booqo Bogga Internetkooda.

people for Education
BECAUSE EDUCATION MATTERS MOST

People for Education is an independent parents' group working to support public education in Ontario's English, French and Catholic schools.

You can reach us at: P.O. Box 64, Station P, Toronto, Ontario, M5S 2S6
Phone: 416-534-0100 • fax: 416-536-0100 • email: *info@peopleforeducation.com* or *visit: www.peopleforeducation.com*